



# Regnbågshuset

- Bar kulan loogu talogalay dadka hbtqi ah

# Goob ay sameeyeen, lala sameeyay loona sameeyay hbtqi-community

Kusoo dhawow Regnbågshuset, goob loogu talo galay kulamada, bandhigyada, wada kulmida, faafinta warbixinada iyo hal abuurka.

Regnbågshuset waa goob lagu kulmo oo loogu talo galay dhammaan hbtqi-community. Waxaad halkaan kula kulmi kartaa, soo abaabuli kartaa oo wax wada hal abuurka kartaan dad kale.

## Yaa loogu talo galay Regnbågshuset?

Dhammaan hawlaha firfircoonida lagu qabto Regnbågshuset waxaa soo saara, lala soo saaraa loona soo saaraa hbtqi-community. Taasi waxay ka dhigan tahay in dhammaan hawlaha firfircoonida ay sidoo kale ku wajahan yihiin dadka hbtqi ama ujeedadoodu tahay in lagu wargeliyo oo la faafiyo aqoonta ku saabsan arrimaha hbtqi. Regnbågshuset waxaa loogu talo galay dhammaan community-ga hbtqi ee ku nool Göteborg, iyo meelaha ka agdhow, iyadoo aan loo eegayn jinsiga qofka, inuusan qofku jinsi gaar ah ka tirsanayn, qawmiyadda qofku ka tirsan yahay, diintiisa ama wax kale oo uu aaminsan yahay, baahi gaar ah (naafonimo), jinsiga uu ka helo iyo da`da.



Amerikahuset. Sawir: Castellum AB

## Sidee u shaqeyaa Regnbågshuset?

Waa dad, kooxo, ururo, ururo/hey`ado abaabulan, dad isku xiran iyo mashaariic ka jirta hbtqi-community kuwaas oo goobta lagu kulmo ku camiraya hawlo firfircooni. Waxa ka dhacaya Regnbågshuset waxaa sidaas darteed hagaya danaha, waxay jecel yihiin iyo baahida hbtqi-community laftarkooda.

Göteborgs Stad waxay ku caawinaysaa shaqaale isku dubbarida hawlaha oo guriga jooga markii bandhig jiro. Göteborg Stad ayaa bixinaysa kharashaadka lookaalka iyo socodsiintiisa.



## **Waa bilaash in qol laga ballansado**

Ma danaynasaa inaad qol u ballansatid (qabsatid) kulan ama soo abaabushid hawlo lagu qabanayo Regnbågshuset? Fiicanaa, waa bilaash! Gal bogga internetka ee Regnbågshuset: [goteborg.se/regnbagshuset](http://goteborg.se/regnbagshuset) wixii warbixin intaa dheer.

## **Regnbågshuset waxaa ka jirta fursad lagu amaahan karo qolal tusaale ahaan loogu talo galay:**

- » Kulamo iyo shirar
- » Wada sheekaysi iyo kulamo bulsho
- » Kulamo bandhiyo aqooneed (workshop) iyo hadal jeedino
- » Hal abuur
- » Bandhigyo dhaqamo
- » Bandhigyo
- » hawlo kafeey (qaxwe) oo fudud
- » goob shaqo
- » Wada hadallo qofka lagu caawinayo oo kala duwan

## **Kusoo biir iskaashiga Regnbågshuset!**

Ma rabtaa in macluumaad joogto ah lagaa siiyo waxa ka socda Regnbågshuset? Waxaad markaas kusoo biiri kartaa iskaashiga Regnbågshuset! Markii aad ka tirsan tahay iskaashiga Regnbågshuset waxaa lagugu casumayaa inaad ka qayb qaadatid oo go'aan ka gaartid sheegtidna waxaad ka qabtid hawlaha socda.

## **Booqo Regnbågshuset**

### **U furan booqasho**

Haddii aad rabtid inaad soo booqatid Regnbågshuset markii aysan jirin wax hawlo lasoo qaban qaabiyay waxaan kugu soo dhawaynanaa markii aan booqashada u furan nahay. Maalmaha uu booqashada u furan yahay Regnbågshuset waa talaado, arbaco iyo khamiis saacadaha 15-18 iyo sidoo kale sabbtida iyo axadda u horreeya bil kasta saacadaha 10-18.

### **Ka qayb qaado hawl firfircooni**

Maalin kasta oo talaado, arbaco iyo khamiis ah iyo sidoo kale sabbtida iyo axadda bil kasta u horreeya waxaa lasoo abaabulaa hawlo ay soo saareen, ku jiraan oo loogu talo galay hbtqi-community. Waxaa markaas dadka soo booqanaya Regnbågshuset mas'uul ka ah ciddii soo qaban qaabisay xafladda/bandhigga.

Mararka qaarkood waxaa shuruud ah in horay loo soo sheego si looga qaybqaato xafladda. Soo ogow waxa quseeya xafladda aad rabtid inaad tagtid. Booqo [goteborg.se/regnbagshuset](http://goteborg.se/regnbagshuset) oo taabo "program".



# Kala xiriir Regnbågshuset

**Telefoon:** 031-365 00 48

**E-post:** [regnbagshuset@demokratimedborgarservice.goteborg.se](mailto:regnbagshuset@demokratimedborgarservice.goteborg.se)

**Wakhtiyada uu furan yahay: gal**  
**[goteborg.se/regnbagshuset](http://goteborg.se/regnbagshuset) taabo "Program" si aad**  
**warbixin dheeri ah uga heshid wakhtiyada uu furan**  
**yahay Regnbågshuset iyo hawlaha firfircoonida.**